

# La dhaqanka bulshadaada

## Sideen u caawin karnaa

Abril 2011



scottish  
refugee  
council

Community - Somali

La qabsiga nolosha Scotland way adkaan kartaa laakiin waxa jira ururo badan, qaar Badan oonu taageero, kuwaasoo si fiican loo meeleeeyey si ay u caawiyaan.



### **Sida shaqaalaha arrimahan ee bulshadaydu ay ii caawin karaan**

Kooxdayadu waxay siisaa talo iyo macluumaad magangalyo-doonka iyo qaxootiga jecel inay samaystaan ururkooda matalaya, waxaanu sidoo kale talo siinaa bulshooyinka deegaanka kuwaasoo siiya adeegyo magangalyo-doonka iyo qaxootiga, ama sare u qaadnaa midaynta qaxootiga bulshooyinkooda dhexdooda.

Waxaanu u shaqaynaa si aanu u habsanno in ururada qaxootiga iyo xubnahoogu ay leeyihiin cod dhamaan heerarka oo dhan bulshada Scottish-ka.

Waxaanu sidoo kale bixin karnaa macluumaad ku saabsan ururada bulshada qaxootiga ah iyo kooxaha kuwaasoo siiya adeegyo, talo iyo macluumaad magangalyo-doonka deegaan ahaan qaxootiga.

Waxaanu la leenahay xidhiidho hay'adaha iyo adeegyada kale kuwaasoo taageera ururada bulshada qaxootiga waxaana dhici karta inaanu awoodno inaanu iyaga u gudbino caawimo darteed.

### **Ururada Bulshada Qaxootiga ah (RCOs)**

Qaxooti badan oo jooga Scotland waxay samaysteen ururadooda bulshada. Ururadani waxay fursado siiyaan si ay ula kulmaan dadka ka yimi waddankii ooy la wadaagaan waayoaragnimada, dhibaatooyinka iyo sidii xal loogu heli lahaa. Waxa sidoo kale jira kooxo dumar kaliya ah, halkaasoo dumarku ku kulmaan si ay ula wadaagaan waayoaragnimadooda gaarka ah ooyna siiyaan taageero dumarka kale ee dhib la mid ahi haysato. Kooxahani waxay kaa caawin inaad la macaamisho bulshadaada deegaanka, la wadaagto dhaqankaaga iyo inaad siiso taageero.

### **Wax badan raadi**

Wax badan ooy ka mid yihiin tafaasiisha la xidhiidhk ee RCO, ka raadi websaaydkayaga:

[http://www.scottishrefugeecouncil.org.uk/how\\_we\\_can\\_help/i\\_want\\_to\\_get\\_involved\\_in\\_my\\_community/refugee\\_community\\_organisations](http://www.scottishrefugeecouncil.org.uk/how_we_can_help/i_want_to_get_involved_in_my_community/refugee_community_organisations)

## **Kooxaha Midaynta**

Kooxaha Midaynta Glasgow waa koox ka kooban hay'ado deegaan, kooxo bulsheed iyo mutadawiciin kuwaasoo qorsheeya oo siiya adeegyo magangalyo-doonka iyo qaxootiga mandaqadooda. Adeegyada waxa ka mid noqon kara macluumaad iyo talo, Xiisado Ingiriisi ah, adeegyo booqasho gadis ah, hawlo carruurta iyo dadka waawayn ah, ooy ka mid yihiin adeegyada iyo hawlaha dumarka sooca ah, barnaamijyo dhaqameed, iyo taageero niyadeed iyo mid muuqata.

## **Raadi wax badan**

Raadi wax badan, ooy ka mid yihiin faahfaahinta lagala xidhiidhayo Kooxaha Midawga Glasgow, websaaydkayaga:

[http://www.scottishrefugeecouncil.org.uk/how\\_we\\_can\\_help/i\\_want\\_to\\_get\\_involved\\_in\\_my\\_community/integration\\_networks](http://www.scottishrefugeecouncil.org.uk/how_we_can_help/i_want_to_get_involved_in_my_community/integration_networks)

## **Sida loola xidhiidho shaqaalaha arrimahan ee bulshadayada**

Waxaad iimayl noogu soo diri kartaa [cdenquires@scottishrefugeecouncil.org.uk](mailto:cdenquires@scottishrefugeecouncil.org.uk) ama wici kartaa 0141 248 9799 si aad ula hadasho mid ka mida xubnaha kooxdayada. Waxaanu nahay koox yar oo awood yar; hadaba waxa dhici karta inaanu awoodi wayno inaan uga jawaabno su'aashaada dhakhso. Si kastaba, waxaan isku dayi doonaa inaan kuula soo xidhiidhno sida ugu dhakhso badan ee suurogal ah.